TILMAAM-BIXIYAHA WAALIDKA XOOGSAARA GO'AANNADA MAALINJOOGGA CARUURTA

Waxaa soo Diyaarisay Maxkamadda Sare ee Minnesota
Guddiga Xoogsaara Maalinjoogga iyoFulinta Masruufka Caruurta

Waxaa Aqbalay
Shirka Minnesota ee Madaha Garsorsoorayaasha
Janaayo 1999

Dib loo eegay Janaayo 2001
("Booqashada" waxaa loo badalay "maalin-joogga" sida uu qaanuunka xusayo)

- ***Qormadatan waxay kaloo ku jirta internetka Maxkamadda Sare ee Minnesota***
www.courts.state.mn.us oo hoos ugu dhaadhac
"Wararka/Akhbaarta Guud – Qoraallada iyo Warbixiinnada".

Warqaddan ma laha xuquuqda daabacaadda waaana la daabacan karaa ayada oo aan oggolaansho laga haysan Maxkamadda Sare ee Minnesota

Faah-faahin dheeraad ah, la xiriir:

Laanta Adeegyda Maxkamadda
State Court Administration
120 Minnesota Judicial Center
25 Constitution Avenue
St. Paul, MN 55155
651-297-7587

JADWALKA DULUCDA

Ujeeddada 2

Mala awaallada 2

Xaddidaada 3

Xaaladaha Khaaska ah 3
- Xadgudubka Caruurta, Dagaalka Guriga, Ku Tiirsanaanta Kiimikada....3
- Marka uu Waalid uu Maqnaado....3

Waxa Ay Waalidka Wax Ku Caawin Karaan....4
- Ka Fogeeya CaruurtaWaxa Dhexdiina Ka Jira 4
- Dhisaan Qaab Isfaham Leh oo Shaqeeya....4
- Dagaalka Degdeg ku Xalliya....5
- La Kala saaro Maalinjoogga iyo Masruufka Caruurta....5
- La Xaqdhowro Cilaaqaadka Waalidiinta-Caruurta....5
- La Fududeeyo Faraqa u Dhaxeeya Labada Waalid....5
- La Dhiirrigaliyo Xiriirka Telefoonka iyo Xiriirka Kale....6
- La Dhiso Nooc Habdhaqan ee Guriga Caadi u ah 6
- Carrurta La Siiyo Waxa Ay Leeyihiin....6
- La Taageero Xiriirka Awooyga iyo Ayeyada iyo Qaraabada Kala Dhexeeya 6
- La Dajiyo Qorshaha Fasaxa 7
- La Dhiso Jadwal Joogta ee Bixidda iyo Soonoqoshada Caruurta....7

Talooyinka Maalinjoogga 8
- Guud Ahaan 8
- Dhaallaamada iyo Socodbaradka 9
  - Hawlaha Korriimada....9
  - Tixgalinta Maalin-joogga 9
  - Whaxa Ay Waalidku Wax ka Caawin Karaan 9
- Xilliga Dugsiga Hortii....10
  - Hawlaha Horumarinta....10
  - Tixgalinta Maalinjoogga 10
  - Waxa Ay Waalidku Wax Ku Caawin Karaan....10
- Dugsiga Hoose....11
  - Hawlaha Korriimada....11
  - Tixgalinta Maalinijoogga 11
  - Waxa Ay Waalidku Wax Ku Caawin Karaan....11
- Dhallinyarada....12
  - Hawlaha Korriimada....12
  - Tixgalinta Maalin-joogga 12
  - Waxa Ay Waalidku Wax Ku Caawin Karaan....12

Gabagabada 13

UJEEDDADA

Haddii aysan jirn xaalado khaas ah, caruurta guud ahaan si fiican ayay ugu najaxaan taageerada joogtada ee xagga niyadda oo ay ka helaan labada waalidba. Fara ku hanyta waalidka waxa ay kobcinaysaa cilaaqaad caafimaad leh iyo korriimo bulsho ee dhexmara waalidka-caruurta. Taasi waxa ay si weyn ugu fiicantahay waalidiinta sababtoo ah waxa ay u badantahay in xiriir wanagsan waalidka uuu la yeelan doonoo caruurta marka ay weynaadaan.

Waalidka aan wada dagganayn, waxaa muhiim ah in ay wada shaqayaan taaso waxtaraysa caruurta. Caruurta si fudud ayay u dareensanayaan dhibaatooyinka, kala tagga iyo kala maqnaanshaha, waalidka waa in ay isla shaqeeyaan oo ay dhisaan isfaham fiican, la xalliyo dhibaatoyinka, iyo la yareeyo khilaafaadka. Waxa fiican in waalidka ay xusuustaan in dhisidda cilaaqaadka fiican waalidiinta-cruurta ay tahay hawl soconaysa inta la noolyahay. Furaha cilaaqaad guul dhaliya ee waalidiinta-caruurta waa tayada wakhtiga halka uu ka ka ahaan lahaa tirada wakhtiga oo ah in ay isla qaataan.

Dhisidda jadwalka maalinjoogga waa meelaha ay waalidiintu khilaaf kaa imaan karo. Qormadan waxa loo sameeyay in waalidka laga caawiyo dhisidda jadwalka maaljoogga oo xoogga saaraya korriimada waxa ay caruurta u baahanyahay dhallaannimada illa ay dhalinyaranimada. Waxa ay muujinaysaa waxa ay caruurta caadi ahaan qabsan karaan heer kasta ee korrimadooda, waxa lagu muujinanaa talooyinka la xiriira maalinjoogga oo loogu talagalay in lagu dhiso horumarin caafimaad leh heer kasta korriimadooda. Waxaa culays la saarayaa muhiimadda in waalidka ay daneeyaan xaaladaha isbaddalka ee la xiriira baahida caruurtooda iyaga oo dhisaya jadwal maalinj-oogga oo caadi ah layskuna halleyn karo, haddana ah mid dabacsan oo had iyo jeer la baddali karo si loo tixgaliyo bahiida caruurtaooda oo hadba sii weynaanaya.

Waalidka waxa lagu dhiirrigalinayaa in ay fahmaan jadwalka maalinjoogga u roon hal cunug waxaa laga yaabaa in aanu ahayn mid u roon caruurta kale ee walaalahooda. Sidoo kale waalidka waxa lagu dhiirrigalinaya in ay fahmaan jadwalka maalinjoogga u roon hal cunug in ay dhici karto in aanu ahayn mid u roon waalidka. Sida ugu wanaagsan ee maslaxadda caruurta ku jirto waxa, waalidiinta waxaa looga baahanyahay in waalidiinta u dulqaataan carqalladaha jadwalkooda badan ama yar maalinjoogga ay dooran karaan. Waalidiin badan waxay kaloo u baahnaan karaan in ay soo gudbiyaan khassaaraha dareenkooda, xaasidnimada, carada iyo niyo jabka marka la samaynayo jadwalka caruurtooda u roon.

MALA AWAALLADA

Akhbaarta qormadan waxa ay ku salaysantahay mala awaallada soo socda:

- In caruurta ay ka faa'iidaysanayso cilaaqadka joogtada ee labada waalidba.
- Marka ay jirto in hal waalid uu masuul ka yahay haynta caruurta.
- Marka ay jirto in hal waalid uu maasuul ka yahay nolol maalmeedka caruurta.
- Labada waalidba ay yiihiin kuwo raalli ka ah iyo awoodi kara in ay caruurta korsadaan.
- Labada waalidba ay rabaan in ay caruurta korsadaan.
- Aysan jirin xaalado la xiriira xadgudubka caruurta, dagaalka guriga, iyo ku tiirsanaanta kiimikada.

XADDIDAADKA

Akhbaarta ku qoran qormadan:

- **MA** baddalayso ama ma weecinayso heshiiska jadwalka maalinjoogga waalidka ama amarka maxkamadda.
- **MA** diidayso ama ma xaddidayso in waalidka ama garsoorayaasha ay dejiyaan jadwalka maalinjoogga oo ka duwan midka lagu talinayo xaashidaan.
- **KUMA** talinayso in la yareeyo ama la badiyo tirada wakhtiga maalinjoogga.
- **KUMA** taxaluuqdo dhammaan qoysaska oo idil ama xaalada kasta ee caruurta la xiriira.
- **MA AHA** "sharci" iyo, inkasto sidaas lagu dhiirrigaliyay in la sameeyo, waalidka lagama filayo in ay raacan taloyinka maalinjoogga ee ku qoran qormadan.

XAALADAHA KHAASKA AH

Maalinjoogga lagu soo taliyay qormadan waxa dhici karta in aysan habbonayn marka ay jiraan xaalado dhab ah ee ku saabsan ammanka jirka ama qiraada caruurta marka ay la joogaan hal waalid. Talooyinka maalinjoogga ee ku qoran qormadan lama isticmaali karo, ama waxa ay u baahantahay in la saxo, haddii ay jiraan mid kamid ah xaaladaha soo socda:

- Xadgudugka jirka, galmada, iyo xadgudubka qiirada oo caruurta loo gaystay.
- Dagaalka guriga oo dhexmaray labada waalid ama walidka iyo caruruta.
- Xadgudub istimcaalka maandooriyaha iyo khamriga.

Xadgudubka Caruurta, Dagaalka Guriga, iyo Ku Tiirsanaanta Maandoriyaha

Waalidka ka qaba walwal dhab ah amaanka caruurtooda waxaa ay raadsan karaan caawimadda qareennada, dhex-dhexaadiye adeegyada maxkamadda, dhakhaatiirta cilmi nafsiga caruurta, xafiiska dagaalka guriga, ama xafiiska adeegyda bulshada ee degmada.

Marka uu Waalid uu Meesha ka Maqanyahay

Marka waalidka, sabab kasta ha noqotee, uusan weligiis qayb ka noqonin nolosha caruurta ama uusan weligiis wax xiriir ah la yeelan caruurta shakhsi ahaan, telefoon ama qoraal ahaan in muddo ah, labada waalidba waa in ay isla eegaan dhibaatoyinka ka imaan kara haddii laysku dayo in wakhti gaaban lagu sameeyo maalinjoog dheer ama habenno la soo dhaxayo. Laakiin waxaa fiican in waalidka si tartiib taartiib ah ay u soo celiyaan jadwalka maalinoogga ee u dhaxeeya waalidka iyo caruurta, iyo in la tixgaliyo heerka korriimada iyo awooda isbaddalka maalinjoogga uu la leeyahay waalidka.

WAXA AY WAALIDKU WAX KU CAAWIN KARAAN

Caruurta Ka Dhowra Waxa aad Isku Haysataan

- **Waalidku waxa ay caruurta ka dhowri karaan iyaga oo ka ilaaliya arrimaha ay isku haystaan dadka waaweyn caruurtana aysan ka dhigan kuwa hadallada u kala qaada.** Mararka qaarkood farrintu waxa ay tahay mid daacad laga yahay sida iyado la xasuusinayo in cunugga uu qaato daawadiisa inta uusan seexan. Mararka kale farintu waxa dhici karta in ay intaas ka culustahay sida in lala soo daahi doono masruufka caruurta. Nasiib darro, kulligeen waanu la soconnaa waxa ka soo bixi kara qofka akhbaarta xun wada. Haddii ay farriintu ay dhib ku noqoto in hal waalid uu waalidka kale uu u sheego bal qiyaas inta uu dhibkaasu la ekaan karo marka caruurta loo gudbiyo faariintaas. Halki ay caruurtooda u isticmaali lahaayeen gudbinta farrimaha, waxaa fiican in ay waalidku iyaga si toos ah u wada xiiriraan ama la kaashadan qof weyn oo ay ku kalsoonyihiin

- **Waalidku waxa ay caruurta ka dhowri karaan iyaga oo ka ilaaliya arrimaha ay isku hayaan dadka waaweyn iyagoo aan weyidiin nolosha uu ku noolyahay waalidka kale.** Markasta oo ay caruurtu lagu riixo in daacadnimadooda qaybiyaan, ama hal waalid uu midka kale khiyaameeyo, caruurta waxay dareemayaan niyad jab haddi ayaga la weydiiyo in ay joojiyaan jacaylka ay hal waalid u qabaan. Waa shay munaasib ah in waalidku daneeyo nolosha caruurtooda waydiiyan “side uu ahaa maalinjooggooda usbuuc-dhammaadka?” Laakiin qasdiga su’aashaas laga leeyahay haddii ay noqoto mid aan maslaxadda cunugga ku jirin, waxa cunugga ku dhalin kartaa sida qof la isticmaalay oo kale oo cara ayuu ka qaadaya.

- **Waalidku waxa ay caruurta ka dhowri karaan iyga oo ka ilaaliya arrimaha ay isku hastaan dadka waaweyn iyagoo oo mid uusan midka kale la dagaallamin ama sharaf ridin.** Waalidiinta qaarkood waxa is arkaan ayaga oo aad ugu caraysan walidka kale caradoodana ku muujiya caruurta hortooda. Waalidiin kalena waxay ku hadlaan ereyo ayga ka dhigaya dad fiican waalidka kalena mid xun. Caruurta waxay aqoonsanyahihiin labada waalidba. Haddi uu hal waalid yaso kan kale, canuugaa wuxuu taa u arkaya mid asaga lagu xumeenayo oo isaga la yasayo.

Dhisidda Isfaham Shaqaynaya oo Micna leh

Waalidiinta waxa ay caruurtooda ku caawin karaan iyaga oo dhisa isfaham labadadooda ee u shaqaynaya carurtooda. Bilowga, waalidiinta qaarkood waxaa dhib ku ah in ay kala saaraan shucuurtooda ku saabsan xiriirkooda ama uu waalidka kale siiyo iyo baahidiisa la xiriirta in ay akhbaarta caruurta ku saabsan wadaagaan. Waalidka waxa ay ariimahan ku xallin karaan iyaga oo uu dhexmaro isfaham caruutooda ku saabsan si “reer magaalnimo ah”. Tani waxaa kamid ah in ay ku heshiiyaan wakhtiga, goobta, iyo habka wax laysku fahamsiinayo Waxa kaloo fiican in la soo diyaario liistada mowduuvyo iyo in la dhaqangaliyo. Waalidiinta aan awood u lahay in wada hadlaan sababo la xiira dagaal socda, colaado, ama arrimo la xiriira dagaalka guriga, waxaa u sahlan in ku dhammaystaan qoraal ama qof weyn oo ay ku kalsoonyihiin u kla dab qaada. Marka laga reebo xaalado khaas ah ee Amarka Badbaadada ama ay maxkamadda ay diido in waalidiintu wada xiriiraan waalidiintu waa inay dhowraan amarkaas ama ay si wada jira ugu heshiiyaan qof saddexaad oo kala taliya guryahooda iyo cinwaannada goobaha shaqada iyo lambarrada taleefoonada. Haddi uu jiro Amarka Ilaalinta ama amar maxkamadded kale oo diidayaa in la isla xariiro, waaliddku waa inay u hoggaansamaan amarkaas ama weydiistaan maxkamadda baddalaadda amarkaas si caruurta loola xariiro.

Khilaafka Si Degdeg Ha Lagu Xalliyo

Waalidka waxa ay caruurtooda ku caawin karaan iyaga oo iskaashada sii degdeg ahna khilaafka ku xalliyaan. Caruurta uu waalidkooda ka dhexeeyo khilaaf ku saabsan maalinjoogga, masruufka caruurta, ama arrimo kaleba waxaa la soo gudoobnaanaya caro, walwal, murugo iyo dib u dhaca korriimada. Waalidka khilaaka waxay ku xallin karaan siyaabo kala duwan, ay kamid tahay in ay latashadaan qaraabada, culumada diinta, dhex-dhexdiyaha, dedejiyaha maalinjoogga, sarkaalka masruufka caruurta degmada, qareennada, iyo kuwo kale. Waalidku waxa kaloo ay caruurtooda ku caawin karaan iyaga oo la tashda dhakhaatiirta cilmu nafsiga ama ayaga oo raadsada adeegyada laga helo wakaaladaha bulshada ee degmada. Mamulayaasha maxkamdda waxa ay hayaan liistada dhex-dhexaadiyayaasha iyo dedejiyaasha maalinjoogga. Uuruka degmada ee qarennada waxa uu haya liistada qareennada.

Kala Saarka Maalinjoogga iyo Masruufka Caruurta

Waalidka waxa ay caruurtooda ku caawin karaan iyaga oo aan ceshan masruufka caruurta ama maalinjoogga. Caruurta guud ahaan waxa ay korrimadooda fiicantahay marka ay haystaan taageerada qiirada iyo dhaqaalaha ee joogta ah iyo wadashaqaynta labada waalidba. Hal waalid xaq uma laha in uu horistaago maalinjoogga ama masruufka caruurta sababo ah in waalidka kale dhankiisa aan fulin amarka maxkamadda ee maalinjoogga ama masruufka. Siido kale:

- Waalidka wax koriya uma diidi karo maalinjoogga waalidka aan wax korin haddii uu bixin waayo masruufka caruurta.
- Waalidka aan cunugga korinin ma diido karo masruufka caruurta marka waalidka wax koriya uu diido maalinjoogga.

Inta la diidi laha maalinjoogga ama masruufka, waxaa jira siyaabo mira dhaliya, waxtara, haddii loo baahdana, ay si sharci ah waalidiiku ku xallin karaan arrimaha masruufka iyo maalinjoogga. Waalidka ka dhexeeya khilaafka maalinjoogga ama masruufka waxa ay la xiiriri karaan dhex-dhexaadiye, qareenka, dhexdhexaadiya maalinjoogga, ama xafiiska masruufka caruurta ee degmada

Xaqhowr Xiriirka Waalidka-Caruurta

Waalidka waxa ay caruurtooda ku caawin karaan iyaga oo istaageera oo xaqdhowra cilaaqaadka uu waalid waalidka ka la leeyahay curuurtooda. Haddii aysan ku heshinin labada waalidba, hal waalid caruurta uma u qorshayn karo meelo haddii taasi ay wax u dhimayso jadwalka waalidka kale uu caruurta la qaadan lahaa. Jadwalka wakhtiga uu waalidka caruurta la qaaadanayo waxaa iska leh waalidkaa iyo caruurta. Waalidka kale ma aha in uu soo faragaliyo wakhtigaan. Waalidiinta waxa kale ay caruurtooda ku caawin karaan iyaga oo toosiya jadwalka si ay caruurta u heelaan wakhti ku filan in hawlohooda ku dhammaystaan.

La Fududeeyo Isu Socodka Hal Waalid iyo Kan Kale

Waalidka waxa ay caruurtooda ku caawin karaan isu socodka hal guri ilaa guriga kale ayadoo la tixgalinayo walwalkooda caruurta una xaqiijinaya in labada waalidba ay isi sii jeclaan doonaan oo ay noloshooda daneenayaan. Caruurta waxaa la soo guboonaada walwalka ka yimaada kalatagga. Tani macneheeda ma aha in caruurta uu cilaaqaad xun la leeyahay labada waalidba. Tani cunugga waxay u tahay oo kale in wixi ka dhacay furriinka ama kalatagga ay mar kale soo noqnoqdaan. Caruurta shan sano ka yar guudahaan ma fahmi karaan wakhtiga, saacadaha, maalmaha ama usbuuc-dhammaadka. Waalidka dhalay caruurta yar waxa ay ku caawin karaan in isfahmaan marka uu cunuggu la joogo waalidka kasta u sameynaya jadwal midabyo kala duwan.

La Dhiirrigaliyo Telefoonka iyo Xiriir Kale

Waalidka waxa ay caruurtooda ku caawin karaan iyaga oo waca ama warqada u dira iyo in ay si caqligal ah ugu caawinayaan in ay wacaan iyo qoraalna u diiraan waalidka kale. Caruurta waxa ay noloshooda sare u kacaysa marka ay xiriir joogta la yeeshaan labada waalidba. Inkastoo uu maalinjoogga yahay hal dhinac si xriirka lagu wado, kuwaa waxaa kamid telefoonnada, warqdaha, emaylka, iyo noocyo kale ee isgaarsin ah. Wacitaanka ka dhexeeya waalidka iyo caruurtooda waa in ay ku dhacaan saacado caadi ah kharajkana uu bixinayo waalidka wax soo wacaya. Haddii aysan maxkamadda diidin, waalidku waxa xaq uu u leeyahay in ay isku diraan kararka boostada, warqado, baakado, emaylka iyo cajalado la daawado iyo iyo kuwa la dhegaysto oo ay u diraan caruurtooda. Caruurta waxa xaq ay uu lehyiin iyo alaabtaa in ay u diraan waalidkooda. Waalidiintu maha in ay faragalinyaan xuquuqdaas.

La Dhiso Habka Nooc Habdhaqan oo Guriga Caadi u ah

Waalidka waxa ay caruurtooda ku caawin karaan in ay raacan wakhtig caadi ah oo cuuntada la cuno, la seexdo iyo in laga shaqeeyo daraasadda guriga. Waalidka waxa kale ay caruurtooda ku caawin karaan in ay aqbalaan in ay kormeer kooban ku leeyihiin waxa ka dhaca guriga waalidka kale iyadoo la dhowrayo awoodda waalidka kale. Laga soo billaabo marka ay yar-yaryihiin, caruurtu waxay bartaan in waalidiinta ay qaabka waalidnimada ku kala duwanyhiin. Caruurta noloshoda waxbay ka hagaaji karaan isbaddalada qaarkood oo ka jira guryaha labada waalid. Koritaanka caruurta waxa ay si fiican ugu najaxaan marka ay guud ahaan si joogta u dhaxeyaan guriyaha laba waalid sababtoo ah waxa ay ku kordhinaysaa degganaansho.

Caruurta La Siiyo Waxa ay Leeyihiin

Waalidiintu waxa ay caruurtooda ku caawin karaan inta ay u dhaxeyaan guryaha labada waalidba iyaga oo horey u sii siiya waxyaabha ay u baahanyihin sida alaabtooda muhiimka ah, dharka, daawoyinka iyo qalabka. Waalidiintu waxa kale ay caruurtooda ku caawin karaan marka ay u dirayaan guriga waalidka kale ayaga oo horay u qaata hadiyadaha uu walidka kale siiyay.

Laa Taageero Xiirirka Awoowga iyo Ayeeyada iyo Qaraabada Kala Dhexeeya

Waalidka waxa ay caruurtooda ku caawin karaan sidii ay ula sii wadi lahaayeen xiriir muhiim ah qoyska, iyagoo loo habaynayo booqashada qoyska aabaha marka ay la noolyihiin aabaha, sidoo kale marka ay la noolyihiin hooyada waxaa loo habaynaya boqashada qoyska hooyada. Caruurta hanata jacaylka awoowe/ayeeyo iyo qaraabada kalaba, waxay u baahanyihiin in xiriirkaas loo sii wado, haddii kale waxay ku dhacaya dareen ah inay khasaareen

La Fududeeyo Toosinta Jadwalka Kumeelgaarka ah

Waalidka waxa ay caruurtooda ku caawin karaan iyaga oo wakhti fiican ku dhiiba ogaysiiska lagu codsanayo in jadwalka lagu sameeyo hagaajin kumeelgaar ah. Xaaladaha degdegga ee qoyska, jirrada hal waalid ama caruurta, dhacdooyin khaas ah ayaa dhici karta in waalidka ama caruurta ay uu baahdaan in si kumeelgaara wax laga hagaajiyo jadwalka maalinjoogga. Waalidka waxa ay caruurtooda ku caawin karaan iyaga oo caruurta u sameeya jadwallo maalinjoog oo kii hore baaddali kara oo lagu hirgalaya sida ugu dhaqsa badan.

La Dajiyo Qorshayaasha Fasaxa

Waalidku waxa ay caruurtooda ku caawin karaan iyaga oo fahma in ay muhiim tahay labada waalidba in uu marba mid caruurtooda fasax u kaxeeyo. Waalidka waxa ay caruurtooda ku caawin karaan iyaga oo jadwal u sameeya kaaso aan faragalin ku samenaynin wakhtiga waalidka kale uu caruurta la joogo amaba uusan waxba u dhimaynin jadwalka caruurtooda. Fasaxa, haddii uu yahay marka dugsiyada ama marka la galayo fasaxyda kulaylaha ayaa ah wakhtiga uu fiican si a waalidiintu u sii ballaariyaan cilaaqaadka ay la leeyihii caruurtooda. Fasaxa waa muhiim sababtoo ah wuxuu waalidka kale uu siinaya wakhti uu ka nasto waalidnimada. Wakhtiga fasaxa waa uu ka muhiimsanyahay maalinjoogga caadiga ah waa haddii aysan jirin amar maxkamadeed ama heshiis lala galay waalidka kale.

La Dhiso Jadwal Joogta ah ee Bixidda iyo Soonoqoshada Caruurta

Waalidku waxa ay caruurtooda ku caawin karaan iyaga oo ku heshiiya cidda caaruuta soo qaadaysa oo soo celinaysa iyo halka ay arrimahaan ka dhacayaan. Waalidka waxa kale ay caruurtooda ku caawin karan iyaga oo caruurta u sii diyaariya wakhtiga loogu talagalay. Marka laga soo qaadayo iyo marka la dejinayo caruurta, waxaa muihiim ah in la iska ilaaliyo wax ismaandhaaf dhaliya. Labada waalid midkoodna looma oggola in uu aado guriga waalidka kale isga oo aan fasax haysan. Waalidku waa in ay ammaanka si weyn uga taxaddiraan marka ay caruurta soo qaadayaan ama ay dajinayaan.

TALOOYINKA MAALINJOOGGA

Guud ahaan

Guud ahaan caruurta waxa ay aad u najaxaan marka taageerada niyadda iyo dhaqaalaha ay ka haystaan labada waalid iyo sida ay u danaynayaan. Dhisidda jadwalka maalinjoogga waa qaab lagu hubinayo ballarinta xiriirkaas. Haqabtirka caruurta waa waxa ugu muhimsan ee waalidku ay tixgalinayaan marka la dhisayo jadwalka maalinjoogga. Baahidaan waxa ay baddalmaysaa inta ay sii korayaan oo hadba her ka heer loo gudbayo. Baahida korriimada dhallaanka, tusaale ahaan, waa ay ka duwanyihiin kuwa socod-baradka ama dhallinyarada.

Qaybtan waxaa lagu aqoonsan karaa hawlo khaas ah oo horumarka caadi ahaan caruurta ay ku gaarayaan heer kasta oo korrimadooda inta aysan u gudbin heerka xiga. Marka la tixgalinayo hawlaha korrimadaan waxaa markasta muhiim ah in maanka lagu hayo in cunug kasta uu abuur gaar ka samaysan yahay, iyadoo caruurta oo idilna aanay isku si u korayn, marka laga hadlayo korriimada “caadiga” wuxu leeyahay baaxad wayn oo heer kasta ee da’da. Sidaas awgeed waxaa dhacda in caruurta lix sanadood jira ay si dhaqsa u koranyaan oo ay ku dhaqaaqaan waxa lagu yaqaanno cunug sideed sanadood jira, halka caruurta kale ee lix jirka ah ay korrimadadooda gaabiso una dhaqmaan sida caruur jira shan sanadood.

Qabytaan waxaa kaloo lagu aqoonsanayaa talooyin la xiriira maalinjoogga oo kor u qaadaya horumarinta caafimaadka heer kasta ee da’da. Meeshi lagu adkaysan laha talooyinka maalinjoogga, waalidka waxa si weyn lagu dhiirrigalinayaa in ay u dhaqmaaan siyaabo qancinaya baahida korriimada khaaska ee cunug kasta. Tani macneheeda waxa ay tahay in waalidka ay u dhisaan jadwallo maalinjoogga ee kala duwan ee caruurta ay dhaleen.
Heerka korrimada caruurta waa hal shay oo la rabo in waalidiintu ay il gaar ah ku eegaan marka la go’aanka laga gaarayo habaynta maalin-joogga ee cunug kasta u fiican. Waxyaabaha kale ee loo baahanyahay in waalidiintu culays ay saraan marka la dhisayo jadwalka maalin-joogga waxaa kamid ah:

- Haddii ay jiraan baahi khaas ee ku taxluuqda cunugga iyo waalidka.
- Jawdwaallada joogtada ee ka dhaxeya caruurta iyo waalidka.
- Haddii ay jiraan arrimo xagga caafimaadka dhimirka oo la xiriira caruurta iyo waalidka.
- Taarikhda daryeel bixinta ee waalid kasta.
- Cilaaqaadka ay caruurta la leeyihiin waalid waliba.
- Cilaaqaadka ay caruurta la leeyihiin awoowe/ayeeyo iyo qarabada kale.
- Cilaaqaadka ay caruurta la leeyiin xubnaha ninka/naagta guursaday hoyadood/abahood.
- Foogaanta u dhaxeysa guryaha waalidkooda.
- Haddii cunugga walaalihiis ay ka qayb qaadanayaan maalinjojoogga cunugga.
- Dabecadda caruurta iyo in si caadi ula qabsanaya isbaddalka marka u ay dhaxeeyaan labada guri.
- Faraqa wakhtiga la soo dhaafay tan iyo markii uu dhacay furriinka.
- Awoodda ay waalidiint u leeyihiin in ay iskaashadaan.
- Faraqa u dhaxeya dhaqanka iyo diinta caruurta iyo tan waalidkooda.
- Dhaqaalaha iyo kharashka kale la xiriira gaadiidka maalinjoogga.
- Wax kasta oo awood u siinaya caruurta iyo waalidka aan caruurta korinin siidii ay u sii wadan lahaayeen xirirka u dhaxeya caruurta iyo waalidka ee danaha caruurta lagu dhowrayo.

DHALLAANKA IYO SOCOD-BARADKA (DHALASHADA - 2 1/2 YEARS)

Hawlaha Korriimada

Hawlaha korrimaada ugu horreeya ee dhallaanka waaxa kamid ah dhisidda jawi iyo dadka ka agdhow, iyaga oo xiriir sookeya la yeesha ugu yaraan waalidka koriya oo markasta sida ugu dhakhsiyaha badan iyo joogto ah u soo jeeda baahidooda, iyaga oo soo dhoweya koolkoolinta dadka kale, isla markaan oohin iyo calaamdo kale kusoo gudbiyaha baahidooda. Dhallaanka iyo socd-baradku waxa ay u baahanyihiin xiriir joogto ah ee labada waalidba iyo in aysan la qabdsan karin isbadallada badan ee ku yimaada jedwalkooda ama noloshada caadiga ah. Qiyaastii marka ay gaaraan lix bilood, ilmahu waxa ay bilaabaan in ay si fiican u kala bartaan kuwa daryeela iyo kuwa kale, taaso horseed u noqon karta cabsida kala tagga. Waalidka ilmaha ayaa bilaabaya xiriir sokeeya oo la yeeshaan ilmhooda iyaga oo markaas aqoonsada calamadaha ilmaha ee la xiriira marka ay cunto rabaan, koolkoolin, hurdo iyo daryeelkaba.

Marka ay caruurta korayaan oo ay ka gudbayaan dhaallannimada ilaa socod-baradka, hawlaha, horumarinta korrimadooda waxaa kamid ah: dareemka jiritaankooda, bilowga xornimada, bilawaga kobcinta hadalka, awood ay u yeeshaan in ay codsadaan marka ay rabaan jiif, cunto, iyo isticmaalka suuliga. Waxaa inta dheer habka waalidka ay sokeyanimada uu la yeelanayo caruurtooda ay ku sii barbaarayaan socod-baradka.

Tixgalinta Maalinjoogga

Waalidiinta dhallaanka waa in ay dhisaan jadwal maalinjoogga aan isbaddal lahayn, lagu tashan karo, iyo caadiyaan laysku hallayn karo. Ayadoo ay ku xirantahay sida loo helo iyo taariikhda daryeelka waalidiinta aan wax korsan, waalidka aan wax korsan waa in la siiyo wakhti gaaban (hal saac illaa saddex saacadood) laakiin maalinjoog joogta ah (laba ama illaa saddex jeer usbuuci) oo dhaca maalintii ama fiidkii. Bacdamaa ay ilmaha soo koryaan oo socd-barad noqonayaan isla markaana qabatima ka fogaanshaha waalikda, waqtiga maalinjoogga waa in la kordhiyo. Waalidka. aan iskumel degganayn, waalidka aan wax korsan waa in uu u tagaa guriga waalidka ilmaha haya. Waxaana dhici karta in maalin-joogga uu ka dhaco guriga waalidka ilmaha haya ama meel u dhow oo ay ilamaha raaxo ay dareemaan. Waxaa muhiim in waalidiinta dhallaanka ama sod-baradka in ay u yeelaan qof habeenkii daryeela. Habeend-dhaxidda iyo dheereynta maalinjoogga uma ay fiicna ilamaha iyo socodbaradkaba. Laakiin caruurta ay u fududahay joogitaanka labada guri, ama ay la dhasheen wiilal iyo gabdho ka waaweyn oo iyaga u raaca maalinjoogga, wax dhib kama imaanayso in ay habeeno dhaxaan ama dheereystaan maalinjoogga.

Waxa Waalidku ay wax ka Caawin Karaan

Waalidintu waxa ay dhallaankooda iyo saanqaadaha caawin karaan:

- In ay dhisaan jadwalka maalinjoogga oo caadi ah wakhtiigiisu joogta yahay.
- In caruurta lagu hayo meel ay yaqaanaan oo nabadgalyo iyo farxad ay ku haystaan.
- Tartiib-tartiib la kordhiyo wakhtiga dheeraadka maalinjoogga.
- In wakhtiga uu ku soo habeen dhaxayo maalinjoogga si fudud loo meelmariyo marka uu cunugga guryaha labada waalidba ay u fududahay joogitaankiisa.
- In caruurta horay logu sii qaado alaabada gaarka u ah, sida kubeertada, waxyaahba laysku madadaaliyo iyo sawirrada waalidka.

DA'DA DUGSIGA KA YAR (2½ - 5 YEARS)

Hawlaha korriimada

Caruurta xilliga dugsiga hortii waxay wadayaan in ay kordhiyaan dareenkooda qofnimo. wuxu. Waxa samaynayaan hadaaq iyo tilmaamo ay ku muujinayaan dareenkooda. Caruurtan xilliga dugsiga hortii barashada waxa walaba iyo waxa cusub ayay aad u daneyaan, iyo kordhinta awooddooda in ay ka fakiraan waxyaabo khiyaali ah. Caruurta gaara heerka korrimadaan waxa ay u maleeynayaan in ay aygu masuul ka yihiin furriinka waalidka ama in aysan waalidka. isku meel degganayn. Waxa ay dareemayaan dayrin waxa ayna jecelhiin in waalidiinto ay isku soo noqdaan. Heerka xasillonidooda waxa uu ku xiranyahay nolol deggan oo caadi ah.

Tixgalinta Maalin-joogga

Waxa muhiim ah in la siiyo jadwalka maalinjoogga joogto ah oo caadi ah. Waalidka. aan isku meel degganayn waxaa ilmaha u roon in waalidka aan wax korin uu tago guriga waalidka kale Tan macneheeda waxa ay tahay in maalinjoogga uu ka dhcayo guriga waalidka wax korinaya ama meel u dhow oo ilmaha ay ku kalsoonyihiin. Inta wakhtigaan lagu jiro waxa dhici karta in ilmaha loo kordhiyo wakhtiga maalinjoogga, oo ay ka mid tahay in ay habeenkii la soo dhaxaan. Caruurta yar habeen dhaxidda waa in aan laga badanin hal habeen usbuuciiba. Caruurta da'da dugsiga ka yar oo xoogaa soo koraya waxaa la siin karaa habeen-dhax dheeraada iyo maalinjoogga badan. Bacadama ay jirto in ilamha uu cilaaqaad joogto ah la leeyahay waalidka aan wax korsan, fasaxyadu waa inay noqdaan kuwo habboon. Maalinjoogga usubuuc-dhammaadka oo si tartiib tartiib loo kordhiyo waxa ay caruurta yar waxa ay fududaynaysaa u gudbidda wakhtiga fasaxa dheer. Wakhtiga gudbidda waxa ay fududahay marka caruurta ay horay u soo qaataan waxyaabahooda u garka ah sida kubeertada, boombolada iyo waxyaabo kale ee waalidka lagu xasuusto. Bacdamaa ay caruurta yar uu hadaaqoodu iyo astaamaha wax lagu fahmo uu kordhayo, waxaa muhiim ah in ay waalidka aflgaddada waalidka kale ay iska ilaaliyaan ama dad kale.

Waxa Waalidku ay wax ka Caawin Karaan

Waalidka waxa ay caruurta yar ka caawin karaan:

- Dhisidda jadwalka maalinjoogga oo joogto ah, oo laysku halleyn karo.
- Tartiib-tartiib la kordhiyo xaddiga maalinjoogga, illaa ay suurtogal noqoto in habeeno la dhixi karo.
- In marka ilmaha guriga waalidka kale ay aadayan ay horay us ii qaataan kubeertoyinka, bomboloyinka, sawirrada iyo waxa lamidka ah ee waalidka kale.
- Laga fogeeyo wax ka sheegga waalkida kale iyo dadka kale marka guriga jogaa.

DUGSIYADA HOOSE (5 - 12 SANADOOD)

Hawlaha Korriimada

Caruurta ku jira da'da dugsiyada hoose waxa ay baranayaan waxa uu yahay horumarinta cilaaqaadka iyo iskashiga aasaagooda iyo dadka waaweyn. Marka ay da'daas jiraan caruurta waxa ay bilaabayaan saldhigga waxbarashada iyo isboortiga. Sida uu qofku qabo in uu yahay, qiimaha ay leyihiin, horumarinta sharafta iyo nabadda shaqsiga ayaa ah arrimaha marka ay da'daas jiraan. Caruurta dhigata dugsiyada hoose aya aqoonsan shaqada waalidka iyo kuwa caruurta ay isku jinsi yihiin. Caruurta waxaa kale u aqoonsadaan waalidiinta in ay yihiin shakhsiyaad, badana waxay ka cabsadaan in ay lumiyaan waalidiinta, iyaga oo dareemaya murugo, caro ka dhalatay furrinka ama kalatagga waalidkooda. Iseedayn, niyojab, iyo iskudayo laysku keenayo waalidka.ayaa caadi ah aan ahayn xubnaha da'daan. Caruurta waxa ay gacan uga baahanyiin caawimaadda waalidka si ay ubartaan xirfadaha habaynta.

Tixgalinta Maalin-joogga

Inkastoo caruurta jira da'da dugsiyada hoose ay si weyn uga faa'iidaystaan wabarasahda guriga ay joogaan, caruurta jooga korrimada heerkan waxa ay ka faaidaysan karaan in wakhti badan la qaataan waalidka kale, taaso marka hore loo baahanyahay in uu jiro xiriir sookeye oo ay la leeyihiin waalidkaas. Caruurta da'daan jira waxa dhici karta in ay raali ka yihiin in mudda ay si joogta ah ay ka maqnaadaan guriga waalidka koriya oo ay ku maqnaadaan maalin-joog qaadanaya laba iyo saddex cisho siiba marka u jiro fasaxa dugsiga ama fasaxa wakhtiga kulaylaha. Marka la kordhiyo wakhtiga ay caruurta la joogaan waalidka kale waxaa si kordhaya kalsoonida uu cunuggu wakhti ku qaato meel ka fog guriga uu degganaa. Xubnaha caruurta ay dad'dooda yartahay, kordhinta tirada maalinjoogga (qiyaastiiba mar cusbuuca) ay la qaataan waalidka kale waa arrin la soo dhaweynayo. Caruurta oo sii waynaataa, maalinjoogga dheer oo wehliya kala guurka waa wax la doorbidi karo.

Waxa Waalidku ay wax ka Caawin Karaan

Waalidka caruurtooda da'da dugsiga waxa ay ku caawin karaan in ay:

- Dhisaan hawlna galiyaan maalin-joog si caadi u shaqeeya.
- Isbaddal tartiib-tartiib iyo kordhinta muddada maalinjoogga.
- Dhiirrigalinta iyo ku gacansiinta telefoonnada iyo warqadaha iyo xiriirka ay la leeyihiin waalidka kale.
- Laga ilaaliyo wax ka sheegidda waalidka kale iyo dadka kale ee guriga jooga.
- In ay barayasha u soo sheegaan waxkasta oo la xiriira cadaadis ay caruurta ka dareemayan iyo in laga caawiyo dhibaatoyinka ka yimaada dugsiga.
- Ay ku dhiirigaliyaan kuna caawiyaan caruurta in ay sii wadaan xiriirka dugsiga, saaxibbada, hawlaha dheeraarka ah iyo shaqada jaaliyadda.

DHALINYARADA (DA'DOODA12 - 18)

Hawlaha Korriimada

Inta lagu jiro sanadaha ugu horreya ee dhallinyaranimada caruurtu waxay sii wadayaan in dhisaan qonfnimadooda iyo istijaaabinta awooddooda. Ayaga oo habkan ku jira, haystana taageerada waalidkooda, waxay dhisayaan arrimaha la xiriira cilaaqaadkooda, nidaamka iyo halka ay bulshada kaga jiraan. Dhallinyarada waxa bilaabayaan hawlaha ay ku kala faaruqayaan waalidiinta, xilligan inta lagu jiro, waxay ay waynayaan waxa ay ku heli jireen caruurnimada, ku tiirsanaanta, iyo difaaca qoyska dhexdiisa. Inta da'daan lagu jiro dhallinyarada waxa ay yeelanayaan heer waxbarasho iyo isboortiga, waxa ay samaysanayaan saaxiibbo, waxana sii soconaysa gaaradka aqoonsiga jinsigooda iyaga oo bilaaba cilaaqaad shukaansi gacaltooyo.

Sanooyinka dambe ee dhalinyaradnimada, dhallinyarada waaweyn waxa ay bilaabya iyagoo dhisayaa qaabab madax bannaan in ay wax ku raadsadaan. Waxa ay sii wadayaan saxibnimadooda lillahida ah, waxa kalo ay dhisayaan akhlaakhda shaqada, iyo hammi ay danahooda ku gaarayaan Sidoo kale dhallinyarada waaweyn waxay koriyaan aqoonsiga jinsi iyo hanashada dareenka galmada Dhalinyaradaan waxa ay u baahanyihiin taageerada labada waalidba. Waxa dhici karta in dhalinyarada ay ka fajacaan cilaaqaadka ay la leeyihiin waalidkooda. Waxaa dhici karta in ay shaki ka qaadaan cilaaqaadka ay la leeyiin walidkooda iyo aasaaggoda, taasoo ku kallifaysa in ay culays xadhaaf leh fuulo ama ay guud ahaan joojiyaan saaxiibtinamda ay dadka la leeyihiin. Waxaa dhici karta in dhalinyarada ay ku kacaan waxyaabo qaab daran ayna ku dhaqaaqaan isticmaalka maandooriyaha ama ay ku lug yeshaan galmo iyo dhaqammo kale ee caafimaadka u daran.

Qaddarinta Maalinjoogga

Waxaa muhiim ah in waalidka. dhalinyarada loo oggolaado in ay la socdaan hawlaha waxbarashada dugsiga, saaxibada, daarasaadka dheeraadka iyo hawlaha jaaliyadaha ee guryaha labada waalidba. Waxaa muhiin ah in in waalid kasta uu hirgaliyo uuna ku dhaqmo nidaamka qoyskooda u sameyeen.

Dhalinyarada waxa ay jecelyihiin in ay wakhti badan la qaataan saaxibbadooda in ka badan tan ay waalidiinta ay la joogaan sida awgeedna waxa dhici karta in ay ka dhaga adaygaan jadwalka maalinjoogga adag. Waalidka waa in firaaqo badan ay siyaan si caruurta ay wakhti u galiyaan danahooda gaarka ah. Waxa kale ee waalidiinta looga baahanyahay in ay nafaas weyn siiyaan caruurta, oo aysan caruurta ku qasbin jadwalka maalinjoogga adag oo caruurta aan wax ku ku kordhinaynin. Si tan looga salgaaro, waalidku waa in ay tixgaliyaan danaha ay caruurta ka leeyihin maalinjoogga lagana wadahadlo.

Dhallinyarada badankooda waxa ay ka faa'idaysanayaan guriga kale ay aadan, oo la aado habeenno khaas ah, usbuuc-dhammaadka, iyo hawlaa ka dhacaya marka la joogo guriga waalidka kale oo jadwalkooda uu yahay mid go'aan oo jooogta ah. Hasayeeshe dhallinyaradaq kale ayaa jecel in wakti iskumid ah la qaataan labada waalidba, oo ay noqon karto illaa laba usbuuc guri kastaba. Dhallinyarada waxa ay ka helaan in laba illaa saddex usbuuc-dhammad ee maalinjoogga bishiiba, taaso ku xiran jadwalka caruurta, fogaanshaha, iyo awoodda gaadiidka. Waalididka aan wax korin waa in uu xiriir joogta la yeeshaa barayaasha caruurta uuna ka qaybgalo bandhigyada caruurta iyo xafladaha muuhimka ah. Waalidiinta meelo kala fog deggan waa in ay wada dhisaan jadwal joogta ah oo wax laga baddali karo.

Waxa Waalidku ay wax ka Caawin Karaan

Waalidiinta dhallinyrada waxa ay ku caawin karaan marak ay:

- Dhisaan jadwalka maalinjoogga iyaga oo la shaqeeya caruurta;

- Dhisaan jadwal maalinjoogga fur-furan ah oo caruurta siiya fursado ay waxooda ku qabsadaan.
- Si joogta ugu dhaqmaan nidaamka qoyska iyo waxa laga filanayo; iyo
- In ay iska ilaaliyaan mala awaalka ah in dhaqanka qalloocan ee caruurta lagu arko uu waalidka kale sabab u yahay.

GABAGABADA

Haddii aysan jirin xaalado gaara ah, caruurta caadi ahaan waxa ay najaxaan marka ay haystaan taagerada qiirada iyo dhaqaalaha iyo sida ay noloshooda uga warqabaan labada waalidka. Ka warqabid la'aanta labada waalidba waxay mar dambe ku keeni kartaa dhibaatoyin la xiriira horumarka caruurta. Caruurta waxa ay dhibaata waliba si dhaqsa uga kabanayaan haddii labada waalid ay iska kaashadaan sidi ay u dhisi lahayeen hababb horumar caafimaad leh iyo isfmaham yareeya dagaalka dhibaatoyikana lagu xallinayo. Caruurtu waxay u baahanyihiin isbaddallo marka ay soo koraanba iyagoo ka gudbaya heer ilaa heerka xiga. Sidaas daraadeed maalinjogg walba waa inuu ahaada mid fur-furan, iyadoo wax laga baddalaya muddaada iyo soonoq-noqoshada inta cunuggu soo korayo una gudbayo heer ilaa heerka xiga Waalidka waxa ay caruurtooda ku caawin karaan aygoo oo fududeeya kala faaruqidda waalidka ayna dhisaan jadwalka maalinjoogga oo xoogsaara danaha caruurtooda. Caruurtu waxay u baahanyihiin isbaddallo marka ay soo weynaadaanba. Sababtaan awgeed, jadwalka maalinjoog waliba waa in uu ahaadaa mid fur-furan, bedelidda iyo dhererka wakhtigiigsa la dabcin karo marka laga kala gudbayo heerarka Koorrimada cunugga. Waxaa muhiim ah waalidka in ay xusuustaan habaynta cilaaqaadka wanaagsan ee ka dhaxeya waalidka iyo caruurta inu uu yahay hawlo nolosha muddo dheer la soconaysa, furaha cilaqaadka mira dhaliyana uu ka imaanayo tayada wakhtiga la galinayo, oo aysan ahayn tirada wakhtiga la galinayo inta ay isla joogaan.